# Dhalinyarada iyo Dadka Dhibaataysan:

Isku xidhka Dhaqaale ee
Dhalinyarada Barakacayaasha Nayroobi ku Nool

*WARBIXINTA TABARUCAYAASHA BULSHADA*
Sebtember 2012

**YAA NAHAY ANAGU?**
Komishinka Qaxootiga ee Dumarka (Women's Refugee Commission) (WRC) waa urur dadka u dooda oo dagan Niiyok, Maraykanka (New York, United States). Wuxuu u doodaa wax ka badalka sharciyada, siyaasadaha iyo barnaamijyada si loo hormariyo noolasha loona difaaco xaquuqda qaxootiga iyo dumarka barakacayaasha ah, caruurta iyo dhalinyarada.

**MAXAANU U IMAANAY NAYROOBI?**
Komishinka Qaxootiga ee Dumarka (WRC) waxay Nayroobi u imaadeen inay baadhaan xaaladda noolasha ee dhalinyarada qaxootiga ah. Waxaa lagu qiyaasay inta u dhaxaysa 52,000 ilaa 200,000 qaxooti iyo magangalyo doon inay ku noolyihiin magaalooyinka Kenya. Inta badan waxay ku noolyihiin xaafadaha danyarta ee la buux dhaafiyay, waxayna ku dadaalaan inay noolal ka sameystaan. Komishinka Qaxootiga ee Dumarka (WRC) waxay daraasaad ku samaynaysaa in dhalinyarada qaxootiga ah ee ku nool magaalooyinka ay heli karaan waxbarasho ama helaan shaqooyin. Waxaan sidoo kale booqanay Baanama (Panama) iyo Qaahira (Cairo), Masar (Egypt).

**MAXAAN QABANAY MUDDADII BOOQASHADANADA?**
Komishinka Qaxootiga ee Dumarka (WRC) waxay booqdeen Nayroobi xaafadaha Islii (Eastleigh), Kaangeemi (Kangemi), Kasaraani (Kasarani), Kawangiweeri (Kawangware) iyo Waydiga (Waithaka). Kooxdu waxay waraysi ka qaadeen 42 shakhsi oo dhalinyaro ah. Waxay sidoo kale fuliyeen siddeed wada hadal kooxeed ah. Dhalinyaradu waxay jireen da'da 15-24; badh waxay ahaayeen dhadig badhna waxay ahaayeen lab. Waxay ahaayeen Soomaali, Oromo Itoobiya ah, Iritaryaan (Eritreans), Ruwaandha (Rwandans) iyo Burundi (Burundians), iyo waliba xogaa Kenyan ah. Komishinka Qaxootiga ee Dumarka (WRC) waxay sidoo kale waraysi la yeelatay shaqaalaha 18 urur kuwaas oo siiya adeegyada noolal maalmeedka dhalinyarada barakacayaasha ah.



Xubin ka mid ah Komishinka baadhista ee WRC oo waraysi ka qaadaysa gabadh qaxooti ah oo ka timid Soomaaliya.

Dhalinyarada dumarka ah iyo ragga ugu badan ee Komishinka Qaxootiga Dumarka (WRC) ay la yeesheen waraysiga waxay kala maqnaayeen qoysaskooda sannado dhawr ah. Qaar waxaa kala qaybiyay dagaalo ay wadaan maleeshiyaan iyo booliis. Waxaa lagu sameeyay jidhdil iyo kufsi. Qaar ehelada dhalinyarta waa la dilay. Qaar waxay u soo qaxeen si dagdag ah waxayna soo dhex jibaaxeen ciidamo iyo budhcad socdaalkoodii Kenya. In badan waxay wakhti ku jireen xeryaha qaxootiga ee Kenya ka hor inta ayna imaanin Nayroobi. Kuwo badan waxay joojiyeen dhigashada iskuulka markii ay ka tageen wadankoodi. Inta badan dhalinyarta aan la sheekeysanay si fiican ooma raadinaynin adeegyada mana oga adeegyada loo heli karo. Intooda badan ma yaqaanaan xuquuqdooda qaxootinimo ama sharciga Kenya.

**RAADINTA WAXBARASHO WANAAGSAN**
Dhalinyarada ugu badan ee qaxootiga ah ee ku nool Nayroobi ma helaan waxbarasho. In badan oo qaxooti iyo magangalyo doon ah waxay u guureen magaalada sababtoo ah ma dhigan karaan iskuul dugsiga hoose ka dib ee xeryaha qaxootiga. Laakiin dugsiyada sare ee dadwaynaha ee Kenya ayaa la kordhiyay lacagtooda sannadka lagu dhigto ilaa 60,000 Shilinka Kenya oo u dhiganta ($710), taasoo dhalinyaro badan ayna bixin karin.

Gabdho badan ma dhigan karaan iskuulka sababtoo ah waa uurley ama waxay haysaa caruurta. Dadka qaxootiga ah waxay dhigan karaan jaamacadda haddii ay bixiyaan lacagta iyo shahaadooyinka haboon ee iskuulka. Magangalyo doonayaasha waxay dhigan karaan jamacadda kali ah haddii ay helaan caawiye Kenyan ah.

**BAAHIDA LOO QABO AMAAN WANAAGSAN**
Dhamaan qoomiyadaha qaxootiga ah waxay sheegeen inay la kulmeen gaboodfal danbi, oo ay ka mid yihiin dhac iyo galmo xadgudub ah. Tani waxay ku keentay ayaga caqabado badan inay shaqaystaan lacag ganacsiga madaw. Soomaalida iyo Itoobiyaanka qaxootiga ah ee ku nool Islii (Eastleigh) waxay sheegeen inuu booliisku u qabto si joogta ah. Booliisku wuxuu ugu hanjabaa inuu dhigayo ayaga xabsi ama waxay ku khasbi inay bixiyaan laaluush, xataa haddii ay haystaan aqoonsiyo sharci ah.

Qaar qaxootiga ah waxay ka sameeyaan qorshayaal dariskooda inay lacag iska aruuriyaan lacala haddii la xidho. Kuwo kale waxay siiyaan booliiska lacag bille ah si ay uga hortagaan handadaad. Laaluushyadu waxay qayb wayn ka yihiin kharashka dadka qaxootiga ah, taasoo saameysa noolal maalmeedkooda.

In badan oo dumarka Soomaalida iyo Itoobiyaanka ah waxay sheegeen amaankoodu inuu khatar ku jiray sababtoo ah waxyeelada caadooyinka, qabiilka iyo cadaadinta qoyska. Maadaama oy jiraan waxyeelooyin amaan (iyo caqabadooyin dhaqan, ee ka jira Soomaalida iyo Itoobiyaanka) waxaa ku adag gabdhaha inay dhexgalaan bulshadooda. Tani waxay keentay inay caqabad adag ku noqoto ayaga inay u xoogsadaan noolasha.

**CAQABADAHA IN LA SHAQEEYO LACAG**
Xog aruurin ay dhawaan samaysay UNHCR waxay ku ogaatay in dadka qaxootiga iyo magangalyo doonka ah ee ku nool xaafadda Islii (Eastleigh) u baahanyhiin in ka badan 3,000-4,000 oo shilin ($35-$48)bil kasta si ay ugu bixiyaan kharashaadka noolashooda aasaasiga ah. Arrintan darteed, ayay ku khasbanyihiin inay khatar u galaan ama shaqo sharci darro ah si ay u noolaadaan. Ku dhawaad kala badh dhalinyarada ah waxay sheegeen anayna haynin shaqo rasmi ah. In badan waxay ku noolyihiin xoogaa lacag ah oo ay ka soo diraan dibadda saaxiibbo ama qoys. Gabdhaha iyo dumarka dhalinyarada ah waxay sheegeen inay haysteen shaqo ku meel gaadh ah oo qorshaysneyn sida shaqada guriga, gacanyaranimada dukaamada iyo meelaha tin qurxinta. Rag la waraystay ayaa haysta shaqooyin ku meelgaadh ah, keenidda caanaha, biyaha ama alaabada, waxayna ka caawiyaan dabakaayooyinka wadada iyo dukaamada. Dhawr kali ah ayaa haysta shaqooyin mushahaari ah.


Gabadh ku iibinaysa hilibka diyaagga KenChic wadada xaafadda Eastleigh ayaa u sheegtay Komishinka Qaxootiga Dumarka inay ugu danbeyntii ku faraxsanyihiin inay lacag ay leeyihiin

Dumarku waxay badanaa heli karaan oo kali ah shaqooyinka lacagta yar eexasho jinsi darteed. Waxaa laga yabaa in lagu danaysto shaqada ama lagu sameeyo xadgudub shukaansi wadooyinka. Tani waxay keentaa inay ku adkaato inay marmaraan magaalada ooy sameeyaan xidhiidh bulsho iyo xoogsiga noolasha.

Xataa ayadoo ay ka jiraan Nayroobi Hay'ado Samafal oo badan, ma jiraan barnaamijyo iyo adeegyo badan oo Hay'adeed taasoo diiradda lagu saarayo dhalinyarada qaxootiga ah. Barnaamijyada jira waxay gaadhaan oo kaliya dhawr boqol oo dhalinyarada qaxootiga ah. Waxay dhalisay, dhalinyarada qaxootiga ah inayna kordhin xirfadahooda. Haddii ay shaqo helayaan, badanaa waa suuqa madaw, mana haystaan fursadaha inay helaan shaqooyin wanaagsan ooy xoogsadaan lacag badan. Dadka qaxootiga badankood waxay ku noolyihiin noolal xun, gaboodfal xaafadeed iyo ku noolaansho cabsida handadaadda booliiska iyo waxyeelada budhcadda.

**MAXAANU GABAGABADII GAADHNAY?**

Aad ayay ugu adagtahay dhalinyarada qaxootiga ah ee ku nool Nayroobi inay kasbadaan dhaqaale. Waxaa sidoo kale ku adag inay helaan iskuulka iyo barnaamijyada taba bareed. Qaar ka mid ah sababaha arrintan waxaa ka mid ah dhibaatada magaalo, handadaadda booliiska, caqabadda helidda suuq xor ah, aqoon la'aanta iyo la'aanta goobo amaan ah bulshada dhexdeeda.

Dhalinyaradu ma yaqaanaan wax badan oo ku saabsan xuquuqdooda ama sharciyada iyo siyaasadaha qaxooti. Ma yaqaanaan barnaamijyada kuuwaas oo jira si loogu caawiyo. Dhalinyaro qaxooti ah oo aad u yar ayaa hela barnaamijyada taasoo lagu caawinayo inay helaan xirafadaha ay u baahanyihiin si ay u helaan shaqooyin.

**MAXAAN KU TALO BIXINAYNAA?**

Dhalinyarada qaxootiga ah ee ku nool Nayroobi waxay u baahanyihiin inay helaan waxbarasho, tababar iyo lacag ganacsi lagu bilaabo. Waa in laga difaaco waxyeelada iyo gaboodfalka booliiska. Hoos waxaa ah qaar talooyinkanaga ah.

UNHCR waa inay:

- ka caawiso barakacayaasha dhalinyarada magaalada ah barashada sharciga qaxootiga, xuquuqda iyo adeegyada;
- samayso waxbadan si loo baro Booliiska Qaranka Kenya sharciga iyo siyaasadda qaxootiga.

Booliiska Qaranka Kenya waa inay:

- ay qaadaan tilaabo ay ku xakamaynayaa handadaadda booliiska iyo baadda dadka ajanabiga ah.

Adeeg Bixiyayaasha (Hay'adaha Samafalka ah) waa inay:

- waydiiyaan dhalinyarada barakacayaasha ragga iyo dumarka fikradahooda marka ay qorshaynayaan barnaamijyo;
- ay ku xidhaan dhalinyarada qaxootiga ah adeegyo kala duwan ayadoo loo eegayo heerkooda baahida. Qof kasta waa inuu helaa kaydadka iyo waxyaabaha caymiska yaryar .
- ay siiyaan dhalinyarada meelo amaan ah si ay oola qaataan wakhti facooda, ay kordhiyaan xidhiidhkooda lataliyayaasha, gaar ahaan gabdhaha iyo kooxaha kuwaas oon lahayn xidhiidh wanaagsan.

Waxaad ka akhrin kartaa warbixintanada oo dhamaystiran iyo talooyinkanaga *ee Dhalinyarada iyo Dadka Dhibaataysan: Isku xidhka Dhaqaale ee Dhalinyarada Barakacayaasha Nayroobi ku Nool, halkan* **http://wrc.ms/SZLSjZ.**

Fadlan aan ku ogaano haddii warbixintanu ay waxtar kuu leedahay iimaylka info@wrcommission.org.

**Mahadnaq**
Waxaan u mahadcelinaynaa barakacayaasha iyo dhalinyarada  ragga iyo dumarka dhibaataysan kuwaas oo siiyay wakhtigooda iyo codadkooda xog-baadhistan.

Warbixintan waxaa suurto galiyay ayagoo maalgalinaya Waaxda Waddanka ee Maraykanka, Xafiiska Dadweynaha, Qaxootiga iyo Soogalootiga.

Sawirada © Josh Chaffin

© 2012 Komishinka Qaxootiga ee Dumarka (Women's Refugee Commission)

Women's Refugee Commission
122 East 42nd Street
New York, NY 10168-1289
212.551.3115
info@wrcommission.org

www.womensrefugeecommission.org